


Haddii aad qabto wax walaacyo ah oo khuseeya ka badqabka dabka, ama haddii aad ka welwelsan tahay badqabka dhismahaaga fadlan la xiriir:

 **0300 790 6555**

 **building.safety@citizenhousing.org.uk**

## Baaskiilada iyo mootooyinka elektaroonigga ah



Waa muhiim in marka la dabaynayo baaskiilada iyo mootooyinka elektaroonigga ah, in loo dabeeyo si badqab leh si looga fogaado halista inuu dab kaco:

- raac tilmaamaha soo-saaraha marka aad dabaynayso oo had iyo jeer ka bixi dabka marka dabayntu dhammaato
- haddii aad ku dabayso baaskiilkaaga ama mootadaada elektaroonigga ah gurigaaga gudahiisa, fadlan xaqiiji inuu guriga kuugu rakiban yahay qiiq-dhowre/kul-dhowre
- ha hurdin ama ha ka tegin guriga iyadoo bayteriyada ay dabka ku jiraan
- had iyo jeer isticmaal jaajarka ama dabeeeyaha soo-saaruhu ansixiyay in loo adeegsado baddeeco kasta oo u baahan in la dabeeyo, oo haddii aad aragto wax calaamad ah oo ah inuu fiiqmay ama cilladoobay ama waxyeello soo gaartay iibso mid rasmi ah oo beddel ah



Haddii aad haysato baaskiil ama mooto elektaroonig ah, nala soo xiriir si aad u hesho talo dheeraad ah oo ku saaban keydinta/dabaynta: **building.safety@citizenhousing.org.uk**. Lama oggola in lagu keydiyo iyo/ama dabeeyo baaskiilada iyo mootooyinka elektaroonigga ah goobaha guud ee la wadaago ee ku dhex yaala dhismeyaasha Muwaadiniinta (Citizen). Si aad wax badan u ogaato booqo: **www.citizenhousing.org.uk/firesafety**



Waxaa lala kaashaday



Muhiimad ayay kuu leedahay inaad ogaato waxa la sameeyo hadduu dab ka kaco gurigaaga, ama dhismaha.

**Fadlan hubi in qof walba oo jooga gurigaaga uu akhriyo warqaddan yar ee badqabka ee ku saabsan waxa la sameeyo marka uu dab kaco.**

## Hadduu dab ka kaco dhismahaaga balse uusan ka kicin gurigaaga gudahiisa – waa inaad **ku nagaado gudaha gurigaaga.**




Dhismahaaga ayaa u dhisan qaab uu u xakamayn karo dabka ka kaca gudaha guriga ugu yaraan muddo hal saac ah. Tani ayaa loogu talagalay inuu siiyo adeegga dab-demiska waqtiga ay dabka ku demiyaan.

Waa inaad ku nagaato gurigaaga inuu kulka ama qiiqu ku saamaynayo mooyee.

Haddii aad ka war hesho dab ka kacay dhismahaaga wac **999** si aad talo uga hesho oo xaqiiji inay adeegga dab-demiska iyaguna ka warqabaan.

## Hadduu dab ka kaco gurigaaga, xaqiiji inuu qof walba garanyo waxa la sameeyo – waa inaad **ka baxdo gurigaaga.**



- 1 Xaqiiji in qof kasta oo ku jira dhismahaaga in aad u sheegto inuu dab kacay oo aad wada baxdaan.
- 2 Xir albaabka guriga marka aad ka soo tagayso.
- 3 Ka bax dhismaha oo adeegso jaraanjarada.
- 4 Wac **999** sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.



## Waxyaabaha qaarkood ee aadan samayn karto si aad u badqabtaan adiga iyo qof kasta oo kale oo jooga dhismahaaga:

- ha dhigin aaggaga guud ee la wadaago, oo ay ku jiraan barxadaha, alaabta kuu gaarka ah
- xaqiiji in alaarmiga qiiqa ee ku yaala gurigaaga uu shaqaynayo adoo si joogto ah u tijaabinaya
- taxaddar muuji marka aad isticmaalayso shumacyada, sigaarka cabbayso ama wax karinayso
- ha taataaban albaabada dabka oo had iyo jeer ha xirnaadaan
- Noo soo sheeg haddii sabab kasta ha jirtee ay noqon karto mid kugu adkaan karta inaad ka baxdo dhismaha – xitaa haddii ay tani tahay muddo gaaban
- waxoogaa waqti ah geli inaad ka akhrido siyaasadda ka badqabka dabka ee loogu talagalay barta [citizenhousing.org.uk/firesafety](https://www.citizenhousing.org.uk/firesafety)



Fadlan halkan iskaan garee si aad u ogaato siyaasadda daangureynta ee loogu talagalay dhismahaaga. Siyaasadaha daadgureynta ayaa sidoo kale laga heli karaa websaydka halkan: [www.citizenhousing.org.uk/firesafety](https://www.citizenhousing.org.uk/firesafety)

Haddii aadan garanayn siyaasadda daadgureynta ee loogu talagalay dhismahaaga, ama aad u baahan tahay farsaad fadlan wac 0300 790 6555 ama iimayl u dir: [building.safety@citizenhousing.org.uk](mailto:building.safety@citizenhousing.org.uk)